Xafiiska Kormeeraha guud
Mary Skipper, Kormeeraha Guud
Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street, 5th Floor
Roxbury, Massachusetts 02119
617-635-9050
superintendent@bostonpublicschools.org
www.bostonpublicschools.org

KU SOCOTA: Guddiga Dugsiga
KA SOCOTA: Kormeeraha Guud Mary Skipper
TAARIIKHDA: Luuliyo 26, 2023
UJEEDO: Qiimaynta Shakhsi ahaaneed

Caawa fiidkii waxaan u soo bandhigi doonaa is-qiimayntayda shakhsi ahaaneed gudiga dugsiga.

Ku soo noqoshada inaan ka shaqeeyo Jagada Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Dadweynaha Boston waa ii sharaf weyn. Waxaan si joogto ah u sheegaa kooxdayda in hortayada ay taalo fursad hal mar nolosha ku soo marta oo lagu caawinayo horamrinta degmadeena si ay u noqoto mid wax qabad sare leh, nidaam waara oo run ahaantii u adeega mid kasta oo ka mid ah 48,000 arday.

10-kii bilood ee la soo dhaafayilaa markii aan noqday Kormeere Guud, wax badan ayaan ka bartay oo aan ka bartay BPS. Qorshahayaga Horumarinta Nidaamka (SIP), warbixinnada Golaha Dugsiyada eecMagaalada, Tafatiritaanka xogta EY, booqashooyinka dugsiga, iyo kulanada aan la yeelanay ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo dadka la shaqeeya dhamaantood waxay iga caawiyeen inaan fahmo waxa suuragalay, waxa shaqeynaya iyo waxa aan u baahanahay inaan bedelno.

Waan ogahay suurtagalnimada iyo filashooyinka laga filayo kormeerayaasha cusub inay tahay in ay meesha ka saaraan wixii hore loo qaban jiray oo ay dejiyaan qorshe cusub ee ay ugu dhihin karaan midayada. Midan waligeed ma ahayn habkayga ama nooca shaqayda. Waxaan aaminsanahay in shaqo badan oo wanaagsan laga qabtay BPS sanadihii la soo dhaafay oo ay hoos imaanayaan qaar kamid ah hogaamiyeyaasha aad u karti badan. Habkaygu waa mid aan ku qiimeeyo waxa oo dhan; go'aaminta si xeeladaysan waxa shaqaynaya; dhageysiga waaya-aragnimada kuwa ka shaqeeya nidaamka iyo u adeega nidaamka; ka dibna hore u dhis si loo hubiyo in aasaasku uu xooggan yahay oo ay taageeri karaan waxa soo socda.

Sanadkii hore, waxaan ka shaqeeyay inaan sameeyo qiimeyntaas aniga oo sidoo kale si firfircoon u samaynaya hormarinta oo aan mudnaanta siinayo dib u dhiska aasaas adag oo leh abuurista iyo xoojinta nidaamyada iyo qaab-dhismeedka muhiimka ah. Sida aan marar badan sheegay, waxaan sidoo kale si buuxda u aaminsanahay in shaqadan ay sida ugu fiican u qabtaan koox, sidaas darteed fooganaantayda kale waxay saarnayd shaqaaleysiinta koox adag, khibrad kala duwan leh, kuwaas oo qaar badan oo kamid ah ay u shaqeeyaan ama hadda u shaqeeyaan BPS si aan u sii wadno dardar iyo abuurista horumarinta iyo nidaamyada waara ee degmadu u baahan tahay iyo ardaydayada, qoysaska iyo shaqaaluhu waxay rabaan oo ay mudan yihiin.

Waxaan u baahanahay inaan cadeeyo– waxaa dhiman hawl aad u baaxad weyn oo ina sugaysa iyo qaar kamid ah go'aamo aad u adag oo dib loo dhigay muddo tobanaan sano ah in la sameeyo. Waxaan aaminsanahay in isbedel weyn uu suurtagal yahay oo looga baahan yahay BPS inay ka gudbaan degmo la dhisay iyadoo ujeedadu tahay in la kala saaro oo lagu sii wado natiijooyin kala duwan oo aan u guurno mid si dhab ah ugu adeega dhamaan caruurta iyada oo aan loo eegin lambarka boostada, isirka, dhaqan, luqadda lagu hadlo, ama naafanimo. Si aan u qabano shaqadan qotada dheer ee adag, waxaan u baahanahay inaan xusno oo

calaamadeyno horumarka aan sameyneyno inta aan wadno, laakiin marnaba ha ku qancin ilaa aan ka dhigno aragtidan dhabta ah ee ardaydeena iyo qoysaskeena, hadda iyo mustaqbalka.

Anagoo dhiseyna nidaamyada aasaasi ah oo aan u baahan doono, waa inaan muujinaa sanad walba horumar la taaban karo oo ku wajahan hadafyadayada iyo cadaynta in nidaamyada aan abuureyno oo xoojineyno ay horseedi doonaan natiijooyin u wanaagsan ardayda, gaar ahaan ardayda aadka aan loo adeegin--Ardayda Madowga iyo Maariinka ah, ardayda naafada ah iyo Ardayda barta Luuqadaha badan ee leh iyo kuwa aan lahayn naafada.

Horumarka shaqadeena iyo natiijada ardaydeena ee la taaban karo waa inay ahaadaan cabirkeena aan ku cabirto guusha, kooxdayda, iyo degmadayada. Dhawr tusaale oo degdeg ah oo ku saabsan nooca horumarka socdo ee aan kormeerno oo aan idin la wadaagi doono:

1. **Bixinta gaadiid badqab leh, la isku halayn karo oo wakhtiga loogu talagalay ku yimaada waa muhiim si loo hubiyo in ardaydeenu ay heli karaan waxbarashadooda.** Waxaan gali doonaa sanad dugsiyeedka 2023-2024 meel aad uga duwan sanad kahor. Degmadu waxay si buuxda u haysataa darawaliinta basaska waxayna leedahay darawalo dheeraad ah oo safka ku jira kuwaas oo dhamayn doona tababarka si aan u bilowno sanad dugsiyeedka diyaarna u ah inaan gaarno hadafyadayada gaadiidka. Waxa aanu heshiis qandaraas cusub la galnay Transdev kaas oo dhisaya horumarka aanu la samaynay iibiyahan oo markii ugu horaysay uu leeyahay dhiirigelin dhaqaale iyo ganaaxyo la xiriira hadadyadayada gaadiidka ee ku jira heshiiskayaga baska. Waxaan dib u habeyn ku sameynay nidaamka si bas kasta uu yeesho ugu yaraan hal kormeere waxaanan sii wadeynaa inaan sameyno horumar weyn oo ku saabsan shaqaaleysiinta kormeerayaasha basaska si qoysaska ardayda waxbarashada gaarka ah aysan u qabsan caqabadihii dhacay sanadkan. Markaan eegno xogta laga soo bilaabo sanadkii hore, nidaam ahaan waxaan hormarinay Wax ku qabadka Wakhtigeeda ah (OTP) waxaanan xalinay boqolleey badan oo xogta GPS ah ee maqan intii uu sanadku socday. In kasta oo aanu dhammaynay sanadka wax ka yar 95% OTP ee ku jira Qorshahayaga Hormarinta Nidaamka (SIP), waxaanu samaynay horumaro hawleed weyn si aanu u wanaajino wax ku qabashada wakhtiga loogu talagalay bil kasta, waxaanu hubinay in dhammaan waddooyinka la daboolo maalin kasta, oo aanu siino qoysaska wada xidhiidhka wakhtiga dhabta ah ee ku saabsan dib u dhac kasta ama caqabado adeeg iyada oo loo marayo Khadkayaga Gaadiidka oo leh shaqaale ku hadla luqado badan oo u adeega qoysaskeena.

2. **Ka dhigitaanka qandaraasyada shaqada iyo mushaharadayada kuwo tartan ah iyo kuwa hadda jira ayaa muhiim u ah dhisidda shaqaale tayo leh oo kala duwan oo u arka BPS meel laga shaqeeyo, lagu horumariyo, oo lagu hormariyo adeegga ardaydeena iyo qoysaskeena.** Dhamaan 18 qandaraas ee shaqaalaha ururadeena waxay ahaayeen kuwo aad u wanaagsan, qaarkood ilaa 3 sano. Waxaan sanadkan ku dhameynay dhammaan 18 qandaraas ee la dhameeyay iyo kuwa hada socda. Waxaan sii wadeynaa inaan dhisno xiriir adag iyo wada shaqeyn aan la leenahay ururadayada si aan u qabano shaqada muhiimka ah ee mustaqbalka looga baahan yahay BPS. Mid kasta oo kamid ah ururadan waxay matalaan shaqaalaha kuwaas oo ay weheliyaan hogaamiyeyaasha dugsigeena kuwaas oo si hagar la'aan ah u shaqeeyay mudada lagu jiray cudurka caalamiga ah, iyaga oo samaynaya wax kasta oo ay u baahdaan, ardaydayada iyo qoysaska. Marka qandaraasyada aan la sii wadaynin, gaar ahaan dhowr sano, shaqaaluhu ma dareemaan ixtiraam ama qiimayn. Waxa sidoo kale dib u habayn ku samaynay qandaraaska hogaamiyaha dugsigeena kaas oo aan dib loo cusboonaysiin todobadii sano ee la soo dhaafay, anagoo la kaashanayna hogaamiyayaasha dugsigu waxa aanu dhisnay wax aan aaminsanahay in uu yahay mid kamid ah qandaraasyada hogaamiyayaasha dugsiyada ee Massachusetts ee ugu tartanka badan. Qandaraasku waxaa laga soo qaatay aaminaad qoto dheer ee ah

sida ay muhiimka ugu tahay hogaamiye dugsiyeedka kartida leh ee udub-dhexaadka u ah inuu hormariyo degmadeena. Waxaan hadda leenahay jadwal shaqo kaas oo noo ogolaanaya sanad kasta in aan diirada saarno wada gorgortanka dhowr qaybood markiiba oo aan ilaalino Degmo tartan iyo meel ay shaqaaluhu dareemaan in la qiimeeyo.

3. **Waxaan horumar ka samaynayna himiladayada iyo qorshahayaga in Dugsi Dadweynaha Boston kasta yahay mid loo dhan yahay oo uu bixin karo adeegyo joogto ah dhamaan ardayda si ay u daboolaan baahidooda. Waxbarashada Loo Dhan Yahay ee BPS waxay ka micnaysantahay inaanu kordhinayna fursadaha wax ku barashada luuqada hooyo ee ardada luuqadaha badan ku hadla iyo kordhinta helitaanka jawiga ugu xaddidan ee ardayda naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa ku hadla luqadaha badan.**
    a. Inta badan ardaydeena ku hadla luqadaha badan ayaa helaya adeegyada ay xaqa u leeyihiin in ka badan sannadihii hore iyo in kasta oo aan wali shaqo badan u hayno, waxaan haysanaa boqolkiiba ugu sarreeya ilaa maanta taas oo qayb ka ah heshiiska Waaxda Caddaaladda ee ardayda luqadaha badan ku hadasha ee helaya adeegyada ku habboon. Waxaan ka kordhinay 89% helitaanka tirada ku habboon ee wax ku baritaanka Ingiriisiga ee loo baahan yahay hadda 94% ee ardayda barta luqadaha badan kuwaas oo helaya qadarka ku habboon barashada Ingiriisiga ee loo baahan yahay. Waxaan balaarineynaa waxbarashada ardayda laba luqadood ku hadla, helitaanka Luuqada Hooyo waxaanan ka shaqeyneynaa hirgelinta qorshahayaga istiraatijiyadeed ee OMME.
    b. Sanadkii lasoo dhaafay waxaan la shaqaynay koox ka kooban in ka badan 22 dugsi si aanu u samayno kooxahooda qorshaynta u dhanaannshaha marka ay bilaabayaan shaqada hormarinta dugsiyadooda si ay u taageeraan dhaqamada u dhanaanshaha. Qaadashada casharadii laga bartay sanadkan, waxaanu si firfircoon uga shaqaynaynaa Qorsheheena Waxbarashada Loo Dhanyahay oo ay ku jiraan qeyb badan oo kamid ah talooyinka ka soo baxa warbixinta Golaha Magaalada ee Dugsiga (CGCS) waxaana la soo gudbin doonaa Ogosto iyada oo qayb ka ah SIP. San ad dugsiyeedka 2023-2024, waxaan ka codsanaynaa dhamaan dugsiyada inay dhisaan kooxahooda Qorshaynta u dhanaansha si aan u soo saarno u dhanaanshaha heerka fasalka oo aan u siino horumar xirfadeed oo dheeraad ah barayaashayada si aan u hubinno in shaqaaluhu ay haystaan tababarka iyo agabka ay u baahan yihiin si ay ugu adeegaan ardaydeena goobaha loo wada dhan yahay halkaas oo ardaydu ay heli karaan wax ku barida luuqada hooyo iyo goobaha ugu yar ee xadidan. Waxa kale oo aanu sii horumarinay oo aanu kordhinay kheyraadka dadaaladayada shaqaalaynta iyo sii haysashada shaqaale anagoo balaaarinayna barnaamijyada gudaha iyo habsami socodka si aanu u helno shaqaale luuqad ahaan iyo dhaqan ahaanba kala duwan, oo shahaado ka haysta waxbarashada gaarka ah iyo ESL ka, taas oo aanu ugu baahanahay inaanu taageerno Qorsheheena Waxbarasho loo dhan yahay.

Kuwani waa sadex tusaale oo keliya oo muujinaya sida shaqadu u socoto, waana sababta ay tahay in aan fooganaanta u saarno dhisidda nidaamyada oo taageera horumarkaas. Qiimayntayda shakhsi ahaaneed, waxaan bixiyay tusaalooyin dheeraad ah waxaanan abaabulay shaqada afarta Heerarka DESE ee qiimaynta kormeeraha. Waxaan halkan ku soo daray afartaas heer iyo mowduucyada aan mid kasta ka samayn doono:

<u>Heerka I: Tiixraca Hoggaaminta</u>

- Tacliinta Loo Siman Yahay
- U dhanaanshaha
- Qorshaha Labda Labada luuqad/OMME
- Kuliyada waqtiga hore
- Balaarinta Waxbarashada Farsamada Gacanta (CTE)

- Taageerada Ardayga: Fursadaha Dhalinta iyo Maqnaanshaha Joogtada ah
-

Heerka II: Maamulka iyo Hawlaha

- Qaab-dhosmeedka Koox: Ku Xigeenada
- Qaab-dhosmeedka Koox: Qaabka Gobolka
- Qorshaynta Xarumo
- Xafiiska Maamulka Xaaladaha Degdegga ah/Qorshaynta Badqabka Dugsiga
- Nidaamka Xiriirada
- Qandaraasyada Shaqaale

Heerka III: Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada

- Dib u habayntass: Hormarinta Sinaanta, Horumarinta Qoyska iyo Bulshada
- Hormarinada Rugta Golaha Dugsiga
- Khadka Caawinka Qoyska ee BPS
- Balaarinta Wax baritaanka Waalidka

Heerka IV: Dhaqanka Xirfadeed

- Xiriirka Gudaha
- Diirad Saaritaanka Horumarinta Xirfadlayaasha
- Hogaamiyaha Qandaraaska Dugsiga
- Qaab-dhismeedka Kulanka

Sida xaaladu tahay degmooyin badan oo waaweyn oo leh isbeddel hogaamineed oo joogta ah, BPS waxay ku hawlanayd ku foganaanta u hogaansanaanta oo ay ku adkaatay inay gaarto hadafyo balaaran oo la qabsi ah oo ku salaysan natiijooyinka ardayda. Anaga koox ahaan waxa go'aansan in aan u bedelno fikirkeena oo aan u gaarsiino degmada boos ay BPS ka sare marto filashooyinka laga qabay oo ay taageeraan dhamaan ardaydeena, gaar ahaan kuwa aan la adeegin. Midani waa in qof kasta qeybtiisa ka qaato. Waxay qaadan doontaa joogtaynta iyo la xisaabtanka kooxdayada hogaaminaysa shaqada iyo hadafka joogtaynta iyo horumarinta joogtada ah.

Waad ku mahadsantahay fursadan aad ugu adeegto degmada oo iga dhigtay macalinka aan maanta ahay. Waxaan si qalbiyad ah u daneeyaa shaqada, ardaydeena iyo qoysaskeena, iyo shaqaalaheena dadaalka badan ee maalin walba u soo baxa si ay u taageeraan ardaydeena. Waxaan ku jirnaa midan si wadajir ah, inkastoo ay hadda jiraan oo ay jiri doonaan caqabado, waxaan aaminsanahay inaan sameyn karno oo ay tahay inaan sameyno isbeddelada loo baahan yahay si loogu beddelo BPS Degmo ku saleysan natiijada iyo guusha ardayga.